

**Somali**

## Miyaad tahay qof ay dhibaato ka soo gaadhay xasarad xagga sinjiga ah?

Haddii lagu weeraray, lagu hanjabay, ama lagu caayey sababtoo ah midabkaaga, sinjigaaga ama asalka qaranka aad ka soo jeedo, markaas waxa aad tahay qof ay dhibaato ka soo gaadhay xasarad xagga sinjiga ah. Xasaradda xagga sinjiga waa denbi halis ah waxana uu u dhici karaa siyaabo kala duwan, sida:

<b>Hadal:</b>	Hadal xun, fallooyin, kaftan ama haddidaad; Iyadoo qofka magacyo loogu yeedhayo ama afxumo;
<b>Khasiisnimo:</b>	Tilifoonno ama waraaqo cay ah ama khasiisnimo ah; Qashin lagu qubo aqalkaaga hortiisa ama laga soo rido albaabkaaga meesha waraaqaha boosta loogu talo galy; Samaynta sanqadh ama qaylo joogto ah; Ashtakooyin xumaani ay ka dambayso oo adiga kugu aaddan oo gaarahaan loo gudbinayo dadka awoodda leh ama xukuumadda;
<b>Jidh-dil:</b>	Waxyeello dhab ah oo jidhka loo gaysto ama haddidaad in sidaas la samayn doono; Waxyeello loo gaysto gurigaaga ama hantidaada iyadoo masalan La burburinayo daaqado ama albaabbo;
<b>Gidaar lagu qoro qoraallo xagga sinjiga ahi:</b>	Qoritaan ama sawir halku-dhegyo.

Xasaradda xagga sinjiga waa sharci-darro. Dadka waxyaabaha noocaas ah sameeya denbi ayaa lagu soo oogi karaa maxkamadaha. Qof kastaa xaq ayuu u leeyahay inuu noolaado isagoon cabsi ka qaban in la soo wareero isaga, gurigiisa ama hantidiisa. Xukuumadda sida ciidamada nabad-ilaalinta, dawladaha hoose iyo dugsiyada waajib ayaa ka saaran inay kaa ilaaliyaan adiga iyo qoyskaaga xasarad xagga sinjiga ah iyo inay tallaabo ka qaadan dadka weerarka qaada. Dadka weerara dad kale sinjigooda dartiis guriyahooda waa laga saari karaa, waa la khasiri karaa ama xabsi ayaa la gelin karaa.

Haddii lagu weeraray markaas waxa weeye inaad si degdeg ah ula xidhiidho ciidamada nabad-ilaalinta. Waxad tegi kartaa saldhigga ciidamada nabad-ilaalinta ee kuugu dhow ama waxad diri kartaa tilifoonka uu lambarkiisu yahay 999 – una sheeg ciidamada nabad-ilaalinta in weerarkaasu uu yahay mid ujeeddada ka dambaysaa ay tahay sinjiga. Waxa kale oo ay tahay inaad u sheegto shilkan cidda leh guriga aad deggantahay. Adeegga One Stop Service ee xaafaddaada ku yaalla, Racial Equality Council (Golaha Sinnaanta Sinjiyada), Citizens Advice Bureau (Xafiiska La-talinta Wadaniyiinta), Xarun arrimaha sharciga ah, xarun mujtamac ama urur qaxooti ayaa iyagana lala xidhiidhi karaa si ay kuu kaalmeeyaan.

Waxa jira tallaabooyin waxqabad ah dawladda hoose ee xaafadda iyo ciidamada nabad-ilaalinta ay tahay inay qaadaan si ay wax uga taraan la dagaalanka xasaradda una taageeraan dadka ay dhibaato ka soo gaadhay xasarad xagga sinjiga ah. Waxay samayn karaan:

- Inay diyaariyaan rakibaadda qalab lagu arki karo waxa dhacaya;
- Inay ku taliyaan in tallaabooyin dheeraad ah oo xagga nabad-sugidda ah ay qaadaan dadka guryahaha lihi;
- Inay wargeliyaan waaxda waxbarashada ama dugisiga uu dhigto ilmaha bahdilka lagu sameeyey;
- Iinay soo geliyaan arrimaha waaxaha adeegga bulshada haddii loo baahanyahay taageero dheeraad ah iyo la sheekaysi xagga caafimaadka maskaxda ah.

Xusuuso – mid kasta oo ka mid ah hay'adaha kor lagu sheegay ayaa bixin kara talo. Laybareeriga xaafaddaada iyo buugga lagu taxay lambarada tilifoonada ayaa laga heli doonaa faahfaahinta sida loola xidhiidhayo.